# Markay carruurtu ka baqaan in waalidkood la tarxiilo

Markii awaamiirta fulinta socdaalka ay xoogeysato, carruur badan ayaa ka baqaya in la kala kaxeeyo iyaga iyo waalidiintooda, iyo dadka kale ee ay jecel yihiin. Qoraalkan, oo ay diyaariyeen xirfadlayaalsha caafimaadka maskaxda ee carruurta, waxa uu sharxayaa talaabooyin ay qoysaska muhaajiriinta iyo qaxootigu qaadi karaan si ay u taageeraan adkaysiga carruurtooda iyo xiriirkooda caafimaadka qaba xilligan cabsida leh.

## Bilowga wadasheekaysiga:

Waalidiintu waxay ka walwalaan in wadahadallada ku saabsan tarxiilka ay sii dhaawici karaan ilmahooda. Si kastaba ha ahaatee, cilmi-baaristu waxay muujisay in marka carruurtu la kulmaan waxyaabo cabsi leh, ay yaraanayso cabsidoodu haddii loo sii diyaariyo waxa dhici kara. Inkasta oo wadahadalladani ay adag yihiin, haddana waa muhiim in la bilaabo goor hore.

Had iyo jeer qaado waqti yar si aad u nasato oo aad u dejiso naftaada ka hor intaadan bilaabin wadahadal sidan oo kale ah. Haddii aadan diyaar ahayn, naftaada daryeel oo mar dambe isku day.

Waxaa laga yaabaa inaad marar badan kala hadasho ilmahaaga arrintan si aad uga jawaabto su'aalahooda oo aad u dejiso.

Isticmaal erayo uu ilmahaagu fahmi karo oo ku hadal cod deggan. Carruurta qaarkood waxay qarsadaan cabsida sababtoo ah ma rabaan inay waalidkoodu dhibsadaan. Hubi in ilmahaagu ogaado inaad rabto inaad maqasho fikradooda qarsoon. Waxaad odhan kartaa sidan oo kale:

*"Aad baan u murugooday markii Adeer Maxamed la qaaday toddobaadkan. Waxaan iswaydiiyay ma ka baqaysaa in wax la mid ah ay igu dhacaan."*

*"Ma maqashay qof dugsiga ka tirsan oo si xun uga hadlay dadka halkan jooga ee ka yimid waddan kale?"*

*"Waa caadi haddii aad dareento cabsi, xanaaq, ama murugo markaan ka hadleyno arrintan. Anigu kama baqo dareenkaaga, mar walbana waxaan rabaa inaan ogaado waxa maskaxdaada ka socda."*



Carruurtaadu waxay maqlaan hadallo sheegaya in dadka aan waraaqaha haysan yihiin danbiileyaal ama cadow. Waxaa muhiim ah in carruurtu ogaadaan in waalidiintoodu wanaag ku dadaalayaan. Sii carruurta tusaale ay ku fahmaan waxa ay ka dhigan tahay in aanad sharci lahayn. Waxaan kugula talineynaa in la iftiimiyo in ay tahay dhibaato xagga maamulka ah. Tusaale ahaan:

*"Dadka waxay u baahan yihiin waraaqo si ay u joogaan Mareykanka, dad badan (oo aan ka mid ahay) weli way sugayaan waraaqahooda. Tani micnaheedu ma aha inaan ahay qof xun; waxay kaliya muujinaysaa in ay waqti qaadato in la helo waraaqahaas. Waxaa laga yaabaa inaan meel kale ku noolaado intaan sugaayo."*

Xitaa haddii ilmuhu yar yahay, u sheeg qofka daryeeli doona haddii ay khasab kugu noqoto inaad tagto, sida nolol maalmeedkiisu noqon doonto iyo qofka uu lajoogayo, iyo sida aad meel fog ugalasoo xiriir karto. Tusaale ahaan:

*"Waalidiinta Ahmed ayaa ku toosin doona, kuna gayn doona xarunta carruurta, kula ciyaari doona, kuu karin doona casho, ilkaha kuu cadayi doona, sheeko kuu akhrin doona, kadibna ku odhan doona habeen wanaagsan."*

Hubi in ilmuhu waqti ku qaatay gurigan oo uu ogyahay in qofkan weyni uu jecel yahay.

Carruurtu waxay dareemaan inay ammaan yihiin marka waalidiintoodu helaan siyaabo ay ku xaqiijiyaan dareenkooda iyagoo isla markaasna deggan.  Marka aad la yeelanayso wadahadallo ilmahaaga, ku muuji dareenkaaga si deggan oo kalsooni gelinaysa. Tusaale ahaan:

*"Haddii aan muddo yar kaa maqanado, aad baan u murugoon lahaa.  Maalin kasta waan ku tabin lahaa oo waan kuu ducayn lahaa si aan mar kale u kulanno. Adiguna maalin kasta waad ku nabdoonaan lahayd eeddo  Fartun gurigeeda."*



## Inta lagu jiro wakhtigaas:

Buuxi qorshe diyaarinta qoyska ee ilmihiina oo dhan. Tusaalahani wuxuu ka yimid  Massachusetts; raadi nooc ka tarjumaya sharciyada gobolka aad degan tahay.

Hubi inaad buuxisay foom kuu oggolaanaya inaad magacawdo qof ama qoys lagu kalsoon yahay si uu u daryeelo ilmahaaga haddii lagaa tarxiilo. U qaado foomkan xafiiska caddeeyaha dadweynaha (notary public) si loo xaqiijiyo in uu yahay mid rasmi ah.


Ka caawi ilmahaaga inuu ku faano qofnimadiisa. Carruurta muhaajiriinta ee ku nool  Maraykanka waxay si fiican u horumaraan marka ay awoodaan inay fahmaan sida loogu dhaqmo  dhaqanka  Maraykanka isla markaana ay xiriir wanaagsan oo adag  oo ay la yeeshaan  hidahooda iyo dhaqankooda. Waxaad taas ku gaari kartaa adigoo:

*Karinta cuntooyinka dhaqankaaga.*

*Dhageysiga muusigga dalkaaga hooyo.*

*Ka qaybgelinta carruurtaada cibaadooyinka iyo dhaqamada diimeed ee adiga kuu gaarka ah.*

Kadib kala maqnaanshiyo gaaban (tusaale ahaan, marka laga soo qaado iskuulka), u sheeg ilmahaaga inaad ka fikiraysay, una sharax inaad weli isku xiran tihiin xitaa marka aad kala maqan tihiin.



Haddii ilmuhu maqlo hadallo xun oo ku saabsan dadka soo-galootiga ah ama dadka Soomaaliyeed, ah, hubi inaanu xanaaqu iyo cabsidu ka tanbadan.  Kadibna bar in hadalladaas ay khaldan yihiin. Tusaale ahaan:

*"Waxay iga xanaajisay in qof sidaas yiraahdo. Waxaa jira dad rumeysan in muuqaalka qofka, luqadda uu ku hadlo, ama meesha uu ka yimid ay la xiriirto sida uu qof wanaagsan ama muhiim u yahay.  Dadkaas waa khaldan yihiin, si xun ayeyna u fakarayaan yihiin!"*

Marar badan ku celi xaqiiqooyinka ugu muhiimsan (in ilmuhu uu la mid yahay qof kasta, oo uu yahay qof wanaagsan oo muhiim ah). Carruurta waaweyn, waxaad la wadaagi kartaa sababaha ay u khaldan yihiin fikradaha cunsuriyadda ama kuwa ka dhanka ah dadka soo-galootiga ah.

Waa muhiim in carruurtu yeeshaan dareen iyo masuuliyad markay cabsi dareemaan. Waxaad la hadli kartaa ilmahaaga oo aad uga sheekayn kartaa 'shaqo' gaar ah oo uu qaban doono haddii aad tagto, sida inuu walaalkiiska ka yar u akhriyo hal buug maalintii, ama uu qoro buug xusuus ah ama sawiro ka sameeyo nolol maalmeedkooda si uu mustaqbalka kuula wadaago.

Jadwalku wuxuu bixiyaa dareen amni wuxuuna caawiyaa ilmahaaga inuu dhisto aqoonsigiisa. Sii wad jadwalka qoyska ee horay loo dejiyay (tagista iskuulka, cuntada, sheekooyinka hurdada, cibaadada iwm).

La hadal qofka laga yaabo inuu ilmahaaga daryeelo marka aad maqan tahay si aad u hubiso in jadwalkani uu sii socon doono xitaa haddii la idin kala geeyo.

Marar badan ku celceli magacyada oo sharax dadka jecelaan doona ee taageeri doona ilmaha, xaalad kasta ha timaadee (macallimiinta, habaryaraha, adeerrada, wadaaddada iwm).

Caafimaadka maskaxdaadu si toos ah ayuu u saameeyaa caafimaadka ilmahaaga.  La xirir si joogto ah dadka iyo dhaqamada kaa caawiya inaad caafimaadkaaga daryeeshid, sidoo kale ka fikir inaad la hadasho xirfadlayaal caafimaadka maskaxda ama hoggaamiyeyaal bulsheed kale.

Buugaagtu waxay ka caawin karaan carruurta inay fahmaan inaysan dareenkooda ku kali ahayn. Waxaana ka sii wanaagsan: haddii aad wada akhridaan, waxay tusinaysaa inaad diyaar u tahay inaad kala hadasho arrimahan la xiriira.

- *The Invisible String*
- *La luna mango: When Deportation Divides a Family*
- *Amigos del Otro Lado*
- *From North to South / del Norte Al Sur*

## Carruurta aadka u yaryar iyo dhallaanka:

U muuji ilmahaaga sawirrada dadka qaraabada ah ee meel fog ku nool, kuna dhiirrigeli in uu u diro "rajooyin saaxiibtinimo."

U dir sawir qoyskaaga qofka laga yaabo inuu daryeelo ilmahaaga, si ilmahaagu uu kuu soo diro rajooyin saaxiibtinimo haddii aad kala maqnaataan.

Carruurta yaryari waxay ciyaarta u adeegsadaan fahamka dareenkooda iyo waayo-aragnimadooda. Ku biiridda ciyaartooda waxay ka caawin kartaa inay kula xiriiraan. Eeg waxa dareenkooda soo jiitay oo ka wada hadla, dhiirrigeli oo amaan, una muuji inaad ku faraxsan tahay inaad la ciyaarto.



Heesaha iyo codadka ay ilmahaagu yaqaannaan waxay ka caawin karaan inuu dareemo amni isla markaana uu xidhiidh la yeesho dhaqankiisa. Dooro hees aad la qaado ilmahaaga si joogto ah, samee duubis codkaaga oo aad heesta ku qaadaysid, ka dibna la wadaag qofka laga yaabo inuu daryeelo ilmahaaga haddii aad maqnaato.

## Carruurta waaweyn iyo dhallinyarada:

Carruurta waaweyn iyo dhallinyaradu mararka qaar waxay dareemaan masuuliyadda ah inay daryeelaan walaalahooda yaryar ama ay shaqooyin lacag lagu helo qabtaan haddii waalidkood la tarxiilo. Hubi inay dareemaan karti iyo kalsooni – tusaale ahaan, inay garanayaan sida loo geeyo walaalahooda iskuulka ama loo nadiifiyo guriga. Dhallinyaradu waxay si fiican ula qabsadaan cadaadiska marka ay dareemaan karti iyo ujeeddo nololeed.

Hubi in walbahaarku uusan carqaladaynin ilmahaaga inuu qabto waxyaabaha taageeraya horumarkiisa iyo mustaqbalka fog: guusha waxbarashada, hurdo wanaagsan, iyo samaynta saaxiibtinimo.U sheeg si cad inaad rabto inuu sii wado hawlahaas xitaa haddii lagaa tarxiilo.

Hubi in dhallinyaradaada ay ogyihiin in ay weli yihiin carruurtaada xitaa marka doorkoodu is beddelo. Ka faa'iidayso dhammaan talooyinka ku jira buugyarahan si aad ugu muujiso inuu kaa go'an yahay daryeelkooda xitaa haddii aanay idinku wada joogin meel. Marar badan magacow dadka caawin doona oo daryeeli doona dhallinyarada oo u doodi doona. U muuji inaad rabto in ilmahaagu yeesho nolol dheellitiran iyo nasasho.

*"Daryeelka Idil iyo Ahmed waa shaqo waqti-buuxa ah, waana aad ugu faraxsanahay inay adiga heli doonaan! Imam Sharif iyo lataliyahaaga dugsiga ayaa ku siin doona taageero dheeraad ah haddii ay kugu adkaato inaad dhammaan hawlahan qabato. Aniga iyo hooyadaa marar badan ayaanu taageeroas u baahnayn."*

Ka caawi dhallinyaradaada in ay si joogto ah xiriir ula yeeshaan qofka hagaya, sida saaxiibada, qaraabo, macallin isboorti, hoggaamiye bulsho, daaweeye, ama macallin. Xiriirkani wuxuu ka caawin karaa inuu helo xasillooni haddii aad kala fogaataan.



## Meelo ay tahay in laga digtoonaado:

Iska ilaali inaad ka sheekayso ama tusiso muuqaallo warbaahineed oo cabsi leh oo la xiriira tarxiilka, sida xarumaha xabsiga ama xarigga qasabka ah.

Iska ilaali inaad si xun uga hadasho kooxo kale guud ahaan (tusaale ahaan: "Maraykan," "Meksikaan," "Dad cad," "Afrikaan Ameerikaan"). Maadaama ilmuhu sii korayo, waxaa muhiim u ah inuu sameeyo xiriir wanaagsan oo uu la yeesho dad kala duwan. Halkii aad diidmo muujin lahayd, xooga saar in inta badan dadka waaweyni ay rabaan inay carruurta caawiyaan, isla markaana dad nooc walba leh ay noqon karaan kuwo ammaansan oo naxariis leh.

Hodges, H. R., Banegas, J. M., Doyle, C. M., Lingras, K. A., & Abdi, S. M. (2025). Markay carruurtu ka baqaan in waalidkood la tarxiilo. (When children are afraid of a parent's deportation).

Waxaa turjumay Dr. Khadar Jaamac.
Email: hhodges@umn.edu.

storyset
SLIDESGO